IIB MA GALO




# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 25 Juunyo 1983 L. 1 R 6

**FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QIIMADU waa 5 Shilin lambar walba—RUKUNKA: Sannadkii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F.R, halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.**


## K O O B N I I N


QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 8 ee 18 Maajo 1983, Dhismaha Warshadda Farsamada Doonyaha Caagga ee Soomaaliyeed. BOG. 340

SHARCI L. 9 ee 1 Juun 1983, Xeer Sharci Lam. 3 ee 14.4.83, Wax ku darid sharciga Hawlaha Difaaca Qaranka (sharci lam. 32,28.4.81. » 350

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 24/Bis ee 28.5.83, Billad Maar oo Hawlkarnimo ah oo lagu Maamuusay Jaalle Xuseen Salaad Dhuxul. » 351


**Wakaaladda M. Qaranka**

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Cali Warsame Cali L. 235 » 352

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Saynab Sheekh Cali L.236 » 353

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Cali Qaasim Jacfar L.237 » 354

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Axmed Cabdulle Calasoow L. 238 » 355

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Axmed Cabdulle L. 239 » 356

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Nuuriye Cabdiraxmaan Xasan L. 240 » 357

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Sheekh Axmed Maxamuud L. 241 » 358

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Cabdi Cusmaan Faarax L. 242 » 359

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Cabdi Keyliye Abayle L. 243 » 360

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Axmed Maxamed Jaamac L. 244 » 361

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Cali Maxamed Geeddi L. 245 » 362

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Ruqiya Maxamed Ashkir L. 246 » 363

WASAARADDA H. GUUD, 17.1.81, Naado Dhul Jaalle Xaawa Cali Maxamed L. 247 » 364

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 1.6.83, Lumid Buug Kayd L. 8683 ku qoran Faadumo Cali Diiriye L. 248 » 365

MAXAKAMADDA G. BANAADIR, 9.6.83, Lumid Buug Kayd L. 12427 ku qoran Xasan Sheekh Maxamed L. 249 » 366

MAXKAADDA G. BANAADIR, 19.6.83, Lumid J. Wareega L. 284994 ku qoran Maxamed Cabdi Hilowle L. 250 » 367

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.6.83, Lumid Jeeg War. L. 523147 ku qoran Aadan Xaashi Cilmi L. 251 » 368

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 4.6.83, Lumid Jeeg War. L. 52345 ku qoran Aadan Xaashi Cilmi L. 252 » 369

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.6.83, Lumid Jeeg War. L. 52346 ku qoran Aadan Xaashi Cilmi L. 253 » 370

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.6.83, Lumid Jeeg War. L. 19702 ku qoran Maxamed Isaaq Ibraahim L. 254 » 371

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.6.83, Lumid Jeeg War. L. 659208 ku qoran Maxamuud Khaliif Wacays L. 255 » 372

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 5.6.83, Lumid Jeeg. War. 554905, 554906, 554907 ku qoran Xaaji Maxamed Ismaaciil L. 256 » 373

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI Lam. 8 taariikh 18 Maajo 1983, Dhismaha Warshadda Farsamada Doonyaha Caagga ee Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dhismaha Warshad Madax bannaan

1. Sharcigan waxaa lag udhisay Warshad Madax bannaan oo ahdda kaddib lagu magaacibi doono «Warshadda Farsamada Doonyaha Caagga Soomaaliyeed» (CRP).

2. Warshaddani waxay yeelan doontaa shakhsiyad qaanuuni ah iyo awood dhaqaale oo madax bannaan, marka laga billaabo 1da Jannaayo 1982.

Qod. 2aad

Kormeer

Waxaa Warshadda gebi ahaanteed hantideeda leh Dawladda J.D.S., waxaana hawlaheeda kormeeri doona Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga, lagumana dhaqi doono sharciga lambarkiisu yahay 17 ee 21.4.74 ee ku saabsan awoodda Wasiirka hay'adaha madaxa bannaan u leeyahay.

Waxaa lagu dhaqi doonaa Warshadda dhanka ahntidhowrka, sharciga lambarkiisu yahay 16 ee bishii Abriil 1970kii ee lagu maamulo hantidhawrka Wakaaladaha madaxa bannaan, Warshadaha, hay'adaha ganacsiga iyo banuugta, hadd iiaanu sharcigu si ka duwan tilmaamin.

Qod. 3aad

Xarunta Dhexe ee Warshadda

Xarunta dhexe ee Warshaddu waa Muqdisho, waxayna laamo iyo Xafiisyo ka furan kartaa meelihii kale ee ay aragto inay ganacsigeeda anfici doonaan, kuwaasoo noqon kara kuwa ay ka furato Degmooyinka iyo Gobollada J.D.S. iyo Dalalak dibadda.

Qod. 4aad

Ujeeddooyinka

Ujeeddooyinka Warshadda Farsamada Doonyaha Caagga (GRP) Soomaaliyeed waxa ay yihiin:

b) Inay sameyso, iibisana Doonyo iyo alaabooyin kale ee laga sameeyo Caagga.

t) In ay ka qeyb qaadato horumarinta Xeebaha Soomaaliyeed, iyadoo sameyneysa Doonyo tayadoodu aad u sarreysa, kuna habboon xaaladda badda Soomaaliyeed. Qiimaha Doonyaha lagu iibinayo wuxuu n qonayaa mid suuragal a huna dhigma qaymaha lagaga soo gato Doonyaha Dalalak dibadda.

J) Inay kordhiso dakhliga lacagta adag ee Dalka soo gasha iyadoo dhoofin doonto Doonyo iyo waxyaalaha kale ee laga sameeyo Caagga.

Qod. 5aad

Awoodda Maamulka Warshadda

Warshaddu waxay yeelaneysaa awoodda Maamuleed ee soo socota:

b) In ay mehered ganacsi, ka hirgeliso Dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, taasoo noqon karta sameynta Doonyaha iyo ka ganacsiga Doonyaha, Matoorada Doonyaha, qalabka Doonyaha ee kale iyo guud ahaan waxyaalaha laga sameeyo Caagga iwm.

t) In ay Warshaddu qorato shaqaalaha ay u baahan tahay, iyadoo tixgeyineysa waqtiga iyo baahida ay u qabto shaqaalahaas iyo hadba siduu k utaliyo Guddiga Agaasimayaasha Warshadda oo ka turjumaya shuruudaha laga doonayo shaqaalaha Wrshaddu u baahan tahay, iyadoo aan la cuskanin sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 22.4.72 ee ku saabsan shaqo qorista iyo qaabka shaqaalanimo ee hay'adaha madaxa bannaan.

j) Inay qorato abaal marinna siiso khubaro iyo hay'-ada kale, iyadoo loogu daneynayo hawl fulinta Warshadda, taasoo la xiriirta sugidda iyo fulinta ujeeddooyinka Warshadda.

x) In ay guud ahaan iibsato kireysato ama wax ka le ku doorsato, qalab ama hanti guurto ama ma guurta ah oo looga baahan yahay socodsiinta hawlaha War shadda.

kh) In ay xuquuq amase dow u yeelato wixii ay Guddiga Agaasimayaasha u arkaan lagama maarmaan amase dan u ah ujeeddooyinka Warshadda.

d) In ay iibiso, hagaajiso, horumariso, kireyso, dooriso, rahanto, ama ay dhameystirto dhammaan amase qeyb ka mid ah hantida iyo xuquuqda ganacsi ee Warshadda, sidii ay Guddiga Agaasimayaashu u arkaan is ay das u tahay.

r) In ay la gasho qandaraasyo, heshiisyo ama iskaashi Dawlado ama hay'ado (Dawladda Hoose iyo kuwa kale oo la mid ah), ama shirkado ama dad kasta oo adduuska ka mid ah.

s) In ay abuurto hanti lacageed oo lagu fulinaayo ujeeddooyinkeeda, taasoo ku imaan karta dakhliga Warshadda ama amaah lagu qaato oggolaanshaha Guddiga Agaasimayaasha.

sh) In ay isticmaali karto, oggolaan karto, aqbali karto, dhimi karto, sameyn karto kuna dhaqmi karto jeegag iyo warqadaha lacagaha la isku dhaafsado.

dh) In ay Bankiyada Dalka iyo dibaddaba ka furan karto xisaab socota, haddii uu Guddiga Agaasiyaasha u arko lagama maarmaan.

e) In ay lacag amaahin karto macaamiisheeda gaar ahaaneed ama ururo, haddii ay ballan qaadayaan ama laga hayo lamaanad.

g) Waxay awood u leedahay in ay uruursato sheegatana lacag kasta oo ay leedahay ama deymaha laga qabo.

f) In ay sameyso wax kastoo lagu horumarinaayo ujeeddooyinka Warshadda.

Qod. 6aad
Xuquuqda gaar ahaaneed ee Warshadda

Dawladda waxay taageereysaa suuq-gelinta waxyaabaha Warshaddu soo saarto.

Qod. 7aad
Canshuur dhaafka iyo u daneynta Warshadda

1. Waxay Dawladda Soomaaliyeed ka saamaxeysaa muddo ku siman shan (5) sano, canshuurta iyo kharajyada hoos ku xusan:

b) Canshuurta soo dejinta iyo dhoofinta.
t) Macaashul-macaashka.

2. Dawladda Soomaalidu waxay Warshadda ka saamaxeysaa muddo ku siman shan (5) sano, canshuurta dakhliga iyo macaashul-macaashka, laga billaabo 1da Jannaayo 1982.

Qod. 8aad
Xubnaha iyo Dihsmaha Warshadda

1) Warshadd uwaxay yeelan doontaa qaab-dhismeedka hoos ku tilmaaman:

b) Guddi Agaasimayaal.
t) Guddoomiye.
j) Maareeye Guud.

2) Xubnaha ka mid noqonaya Guddiga Agaasimayaasha iyo hawlahooduba waxay ku qeexan yihiin qodobbada soo socda.

## Qod. 9aad

### Guddiga Agaasiyaasha

1) Guddiga Agaasimayaashu waxay mas'uul ka noqonayaan dejinta iyo habeynta Siyaasadda Warshadda, iyadoo wixii isbeddel ahna go'aamintooda iyagu oggolaanayaan.

2) Guddiga Agaasiyaasha wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

I) Wasiirka Kalluumeysiga Guddoomiye
II) Maareeyaha Guud ee Warshadda
III) Wakiil ka tirsan Wasaaradda Qorsheynta
IV) Wakiil ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda
V) Laba xubnood oo ka tirsan Ganacsatada gaar ahaaneed oo uu soo magacaabay Wasiirka Kalluumeysiga.

3) Shirarka Caadiga ah ee Guddiga Agaasimayaasha waxaa la isugu imaanayaa ugu yaraan laba jeer sanadkiiba. Hase ahaatee, qabashada fadhiyada aan caadiga ahayn, waxaa codsan kara xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Agaasimayaasha.

4) Qabashada shirarka waxaa ogeysiinaya Agaasimayaasha Maareeyaha Guud, kaddib marka uu la tashado Guddoomiyaha, isagoo ku gaarsiinaya warqad, ugu yaraan laba toddobaad ka hor.

5) Agaasime kasta wuxuu leeyahay hal cod xubin, go'aankana waxaa lagu gaarayaa aqlabiyad sahlan. Haddiise codadka oggolaanshaha iyo kuwa diidmadu ay isla ekaadaan, waxaa dhaqan gelaya cod bixinta uu raaco Guddoomiyuhu.

6) Go'aanka Guddiga Agaasimayaashu ma ansaxayo, haddii aan go'aankaas lagu gaarin fadhi ay ka soo qayb galeen ugu yaraan afar (4) Agaasime.

7) Guddiga Agaasimayaasha marka laga reebo Maareeyaha Guud ee Warshadda waxay xaq u leeyihiin gunno fadhi, taasoo uu xaddigeeda oggolaan doono Wasiirka Kalluumeysigu, isagoo tixgelinaya talada Guddiga Agaasiyaasha.

8) Hadal qorayaalka shirarka Guddiga Agaasimayaashu wuxuu noqonayaa midka rasmiga ah ama kan Ingiriiska.

Qod. 10aad

Muddada Xilka Guddiga Agaasimayaasha

Xubnaha Guddigu waxay xilka haynayaan muddo dhan laba sano, laga billaabo taariikhda la magacaabay.

Xubnaha dib waa loo soo dooran karaa muddo kale, waxayna ku xiran tahay oggolaanshaha iyo go'aaminta cidda ku shaqada leh.

Qod. 11aad

Magacaabidda Saraakiisha Warshadda

1) Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeerka Madaxweynaha J.D.S. iyadoo Madaxweynuhu tixgelinaayo talada Wasiirka Kalluumeysiga.

2) Madaxda qeybaha shaqada ee Warshadda, waxaa u magacaabaya hawlahooda, iyadoo la tixraacayo qodobka 5aad, xarafkiisa (b) ee sharcigan, Guddoomiyaha Guddiga, isagoo tixgelinaaya waanada Maareeyaha Guud iyo tan Guddiga Agaasimayaasha.

Qod. 12aad

Xilka Maareeyaha Guud

Warshaddu waxay yeelanaysaa Maareeye Guud oo ah madaxa hawl-fulinta Warshadda, isagoo yeelanaya awood buuxda iyo mas'uuliyadda maamulka oo idil iyo la socodka hawl-maalmeedka Warshadda oo dhammaantood lagu fulinayo Siyaasadda iyo miisaaniyadda ay go'aaminayaan Guddiga Agaasimayaasha.

Qod. 13aad

Xisaabaadka

1) Maareeyaha Guud waxaa waajib ku ah marka uu dhammaado sannad lacageedka Warshaddu, inuu saddex bilood gudahood ugu soo bandhigo Guddiga Agaasimayaasha, si ay u oggolaadaan, warqadda dheellitirka lacagaha (Balance Sheet), Macaashka iyo khasaarada (profit & loos accounts), isagoo muujinaya xaaladda dhaqaale ee Warshaddu ilaa iyo dhammaadkii sannad lacageedkii hore iyo dakhliga lacageed ee ka soo baxay hawl-fulinta sannadkaas.

2) Maareeyaha Guud waa inuu u gudbiyaa, bil kasta gudaheed, rubac kasta ee sannadka, warqad ku meel gaar ah ee dheellitirka xisaabta oo caddeyneysa faa'iidooyinka iyo khasaaraadka, si ay u oggolaadaan.

3) Maareeyaha Guud ee Warshaddu, wuxuu u gudbinayaa xisaab xir sannadeedka Guddiga Agaasimayaasha, si ay u oggolaadaan, isagoo sii raacinaya warbixin sanadeedka lagu tifaftirayo hawl-qabadka Warshadda sannadkii la soo gudbay, laguna xusayo natiijooyinkii ka dhashay hawshii la soo qabtay, iyada oo la muujinayo waxtarka amase waxyeelada ka soo ifbaxday. Warbixinta waxaa ka mid ahaan doona oo ku jiri doona arrimaha soo socda:

I) Tirada shaqaalaha iyo mushaarka la siiyo,

II) Tiro koobka wax soo saarka,

III) Tiro koobka iibka jumladda,

IV Daraasadda dhibaatooyinkii lala soo kulmay meeshii lagala kulmay iyo wixii laga soo qabtay.

4) Afka loo adeegsanayo xisaabaadka Warshadda, waxay noqon doontaa midka rasmiga ah ama afka Ingiriiska.

## Qod. 14aad
## Hantidhawrka Xisaabaadka

Xisaab sannadeedka Warshadda, waxaa hantidhawraya Sarkaal hantidhawre ah ( oo ka socda Handhawrka Guud) ama Guddiga Agaasimayaasha oo uu wakiishay Hantidhawrku.

## Qod. 15aad
## Qaab Shaqaaleedka Maamulka Warshadda

Warshadda Farsamada Doonyaah Caagga Soomaaliyeed, waxay yeelan doontaa hab qaabeed shaqo iyo shaqaale, oo muujinaaya, qeexayana waajibaadka iyo xuquuqda shaqaalaha, gaar ahaan mushaarkooda, gunnooyinkooda iyo hawl-gabkooda.

Qod. 16aad

Miisaaniyadda

1) Muddo aan ka badneyn saddex bilood gudahood, inta uusan dhammaan sanna dlacageedka, ayaa Maareeyaha Guud u gudbinayaa Guddiga Agaasimayaasha, si ay u oggolaadaan, dakhliga iyo miisaaniyadda sannadka dambe ee Warshadda.

2) Guddiga Agaasimayaashu waxay oggolaanayaan warbixin xisaabaadka Warshadda, ugu dambeyn 31da Maarso sannad kasta, taasoo loo gudbinayo Wasaaradda Maaliyadda iyadoo la raacinaayo warbixin sannadeed tifaftiran.

Qod. 17aad
Hantida Warshadda

Hantida Warshaddu waxay ka kooban tahay:

1) Dhammaan hantida ma guurtada ah (fixed assets) iyo guurtada (movable properties) ee ay gadatay, loogu deeqay, ama si sharci ah loogu wareejiyay.

2) Dhammaan lacagaha Warshaddu dhigato Dalka Soomaaliya ama kuwa dibadda iyo wixii lacag caddaan ah oo ay haysato.

3) Deynta Warshaddu ku leedahay macaamiisheeda, ha noqdeen kuwo gaar ahaaneed ama hay'ado kala geddisan.

4) Wixii qalab iyo alaabooyin ah ee Warshaddu leedahay.

Qod. 18aad
Hab lacageedka

1) Sannad lacageedka Warshaddu wuxuu billaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31da Disembar.

2) Macaashka laga helo Warshadda waxaa dib loogu maalgelinayaa Warshadda, iyadoo la raacayo go'aanka Guddiga Agaasimayaasha, kuwaasoo sugi doona baahida lacageed ee hawlaha Warshaddu fulineyso mustaqbalka.

Qod. 19aad

Xeer Nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ayaa awood u leh in uu Warshadda u soo saaro Xeer Nidaamiye isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.

Qod. 20aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda la saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Maajo 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI lambar 9 taariikh 1 Juunyo 1083, Xeer Sharci lambar 3 taariikh 14.4.1983, wax ku darid sharciga Hawlaha Difaaca Qaranka (Sharci lambar 32 ee 28.4.1981).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WIXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci Xeerka Sharci tirsigiisu yahay 3 soona baxay 14.4.1983, kuna saabsan «Wax ku darid sharciga hawlaha Difaaca Qaranka lambar 32 ee 28.4.1981».

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Juunyo 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 14/bis ee 28 Maajo 1983, Billad Maar oo Hawlkarnimo ah oo lagu maamuusay Jaalle G/le Xuseen Salaad Dhuxul.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUI ARKAY: Sharciga Lam. 65 ee 19ka Okt. 1970 ee abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYAY: Qoraallada Guddiga Kormeerka G/Dhexe ee Xisbiga iyo warbixinta Cii-

MARKUU TIXGELIYAY: Sida geesinimada lahayd sa daafacaadda Dalka;

danka Difaaca Degmada Iskushuban;

MARKUU TIXGELIYAY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeya niyad sami iyo hawl laceyl; kana qayb qaata gudashada hawlaha qaranka, looga recbo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYAY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo soeda:

Qodob Keliya

Waxaa lag umaamuusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO JAALLE G/LE XUSEEN SALAAD DHUXUL oo ka tirsan C.Q.S. Gobolka Bari.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha JDS, soo saxiixo.

Muqdisho, 28 Maajo 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SADDEXAAD

# TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
## WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

### NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Warsme Cali uu u soo qorty Arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2.1.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 690 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Wddo |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 43 |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 39 |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 44 |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 235 .

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab Sheekh Cali ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 18.11.80 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 78

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (39) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 236

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Qaasim Jacfar uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 6.6.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yaahy Retangol Addimihiisuna yihiin 40X15 kuna fadhiya 300 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Wad. Bandar Qaasim |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 407/78 |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhulkiisii hore |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo aqoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 237

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Axmed Cabdulle Calasow uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd21.1.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaab-kiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 26

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 25

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 29

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 238

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Axmed Cabdulle uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 9.7.80 uu ku weydiistay gabal dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 77

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 79

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 239

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nuuriye Cabdiraxmaan Xasan uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.1.81 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0028 Y.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0025 Y.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qafkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi kar aamuddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 240

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Axmed Maxamuud Cumar uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taaraakhdu ahayd 27.5.64 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Masaajid

Koonfur waxaa ka xiga: Gal Lam. 402/78

Galbeed wax aaka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Gal Lam. 1306/60

Qafkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 241

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Cusmaan Faarax uu usoo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 25.8.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 299 K.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 303 K.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 302 K.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 242

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Keyliye Abayle uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.9.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Waddo |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 0520 Y. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 9519 Y. |
| B a r i waxaa k axiga: | Dhul Lam. 0523 Y. |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taa lWaaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Shaqciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 243

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Maxamed Jaamac uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 6.1.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 320 W. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 310 W. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 314 W. |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasuiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 244

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Cali Maxamed Geedi uu u soo qortay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 22.1.61 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Rettangol Addimihiisuna yihiin 25X30 kuna fadhiya 750 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Maxamuud Jumcaale |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Cabdul/hi Shire Xayle |
| B a r i waxaa ka xiga: | Maxamed Cali Faarax |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 245

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ruqiya Maxamed Ashkir Maarey ay u soo qoratay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aahyd 27.9.80 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 336 K.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 340 K.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 339 K.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 246.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaawa Cabdi Maxamed ay u soo qoratay Arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2.1.81 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0025 Y.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0024 Y.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0028 Y.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lag usoo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Jennaayo 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

K/S. Xaaji Maxamed Maye

L. 247

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 8683 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 37.000/= uu iska lahaa Faaduma Cali Diiriye sida ku cad warqadda lam. ———— taariikh 29.5.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 8683 oo ku qoran magaca Faaduma Cali Diiriye ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 37.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 2aad u beddelo Faaduma Cali Diiriye Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 1.6.1983

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 248

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU UARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buugga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 12427 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 180,040/= uu iska lahaa Xasan Sheekh Maxamed sida k ucad warqadda lam. 00420 taariikh 8.6.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Keydka lam. 12427 oo ku qoran magaca Xasan Sheekh Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 180.040/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Saddexaad u beddelo Xasan Sheekh Maxamed Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriydda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 9.6.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 249

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: J. Wareegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 284994 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xis-Guud kuna qoran lacag dhan Sh. So. 30.000 uu iska lahaa Maxamed Cabdi Hilowle sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 5608 taariikhdeeduna tahay 19.6.83 ee Bankiga Gancsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareegga lam. 284994 oo ku qoran Maxamed Cabdi Hilowle ayna ku jirto Sh. So. 30.000 .

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xis-Guud u beddelo J. Wareegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.6.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 250

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 523147 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iskalahaa Aadan Xaashi Cilmi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00426 taariikhdeedu tahay 14.6.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

### WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. 523147 oo ku qoran Aadan Xaashi Cilmi ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

### WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Saddexaad u beddelo J. Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laba keenin.

Muqdisho, 14.6.1983

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 251

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 523145 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Jaalle Aadan Xaashi Cilmi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00426 taariikhdeeduna tahay 14.6.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. 523145 oo ku qoran Aadan Xaashi ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Saddexaad u beddelo Jaalle Aadan Xaashi Cilmi ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.6.1983

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 252

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 523146 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Aadan Xaashi Cilmi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000426 taariikhdeeduna tahay 16.6.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareegga lam. 523146 oo ku qoran Aadan Xaashi Cilmi ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Saddexaad u beddelo J. Wareegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mir ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.6.1983

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 253

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 19702 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta XARUNTA kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 25.489/= oo uu iska lahaa Maxamed Isaaq Ibraahim sida ku cad warqadda lam. 03039 taariikh 16.6.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 19702 oo ku qoran Magaca Maxamed Isaaq Ibraahim ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 25.489/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u beddelo Buug Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 19.6.1983

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 254

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 659208 lagana soo saaray Bankiga gaysa kuna qoran lacag dhan Sh. So. 15.000/= uu iska lahaa Maxamuud Khaliif Wacays sida ku cad Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Harwarqadda lmbarkeedu yahay 5766 taariikheeduna tahay 27.6.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xisaabaadka Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. 659208 oo ku qoran Maxamuud Khaliif ayna ku jirto Sh.So. 15.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Gancsiga iyo Keydka laanta Hargeysa u beddelo J. Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmig aah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.6.1983

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 255

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

UJEEDDO:- Cusbooneysiin Jeegag Wareega ee lumay kala ah sidatan:-

1) J. W. Lr. 554905 ku dhigan tahay 50,000/= ee taariikh 10.5.83.

2) J. W. Lr. 554906 ee ku dhigan tahay 50,000/= taariikh 10.5.83.

3) J. W. Lr. 554907 ee ku dhigan tahay 32,000/= ee taariikh 10.5.83 dhammaantoodna laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa.

GARSOORAHA M. G. W/GALBEED EE HARGEYSA

MARKUU ARKAY: Arjiga ku taariikheysan 28.5.83 ee uu soo qortay Jaalle Xaaji Maxamed Ismaaciil kuna codsanaayo in loo cusbooneysiiyo Jeegagga Wareega ee lacagtiisa iyo lambaradooduba sare ku qoran yihiin;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, kuna taariikheysan 30.6.83 ee lagu caddeeyey in taariikhaha ujeeddada sare ku qoran laga sameeyey Jeeggagaas Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa loona sameeyey Xaaji Maxamed Ismaaciil; Lacagtooduna isugeyn dhan tahay Sh .So. 132,0000/=;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69-70 Xeerka Lambar 2 soo baxay 9.9.1965kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal Gareeyo Jeegaggii lumay, loona Cusboonaysiiyo Jaalle Xaaji Maxamed Ismaaciil, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro Jaallaha kor ku magacaaban 15 maalmood kadib, maalinta Go'aankan laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa inuu ku dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga iriddiisa si ciddii haysatay Jeegaggii lumay ee kor lagu kansal Gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan:

Hargeysa, 5.6.1983

GARSOORAHA MAX.G. HARGEYSA

(Maxamuud Xasan Cumar)

KAALIYAHA MAX. G. HARGEYSA

(Maxamuud Jaamac Cigaal)

L. 256

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

BUDOOMIRAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 2591 lagana soo saaray Bankiga Dhexe ee Soo maaliyeed Xamar kuna qoran lacag dhan Sh. So. 10.000 uu iska lahaa Xaaji Jaamac Guuleed Axmed sida ku cad Warqadda lambarkeedu XG—30.3369 taariikhdeedu 8.6.83 ee Bankiga Dhexe ee Soomaali

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortemento) J. War. lam. 2591 oo ku qoran Xaaji Jaamac Guuleed ayna ku jirto Sh. So. 10.000.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Dhexe u bedelo Xaaji Jaamac Guuleed ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee J. D. S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.6.83

BUDOOMIRAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 257